

# DEGMADA KING COUNTY MAXKAMADA DHALINYARADA BUUGA TABAHA WAX LA ISAGA DABARO

**WAA HAGE LOOGU TALAGALAY IN UU QOYSKAAGA KA CAAWIYO INAY WAX KA OGAADAAN HABKA CADAALADA EE U GAARKA AH DHALINYARADA**

# GOGGOLDHIG IYO MAHADNAQ

Buugaan waxaa laga qoray afkaartii iyo arragtidii waalidiinta, dhalinyarada iyo xirfadlayda bartay cilmiga caafimaadka maxkaxda. Dadkaan wada jirka uga qayb qaatay buugaan waxay isugu jiraan xubno ka socda gudiga dusha ka eega barnaamijka **CADAALADA DHALINYARADA 101.** Waxaana ka mid ah ( iyagoon si gooni ah u kala horeeyn) Bruce Knutson, Susan Waild, Mark Wirschem, Teddi Edington, Steve Gustaveson, Rick Lichtenstadter, Tamara Johnson, Elinor Cromwell, George Yeannakis, Susan McLaughlin, Steve Williams, Jeanette Barnes, Wyman Yip, Jacqulyn Arrington, Marcus Stubblefield, Kathy Santucci, Kelly DePhelps, Pam Jones, Sandy Barnes, Andrea Wallace, Karen Trayler, Lee Davis, Rosa Peralta, Marcy Pareira, Sashya Clark, Jeanie Nelson, iyo Kelly Warner-King. Taas waxaa raaca in jaalayaal kale oo qoysas iyo doodeyaal jooga gobalka Washington ay wargalin soo gaarsiiyeen hawshaan ayagoo soo tiigsaday tabarucaadooda ku wajahan doodista danaha qoyska. Waxaa jaalayaashaas ka mid ah Carolyn Cox, Sharon Gentry, Nelson Ranscon, Curtis Dennis, Ann Varpness, Ron Jaeger, Janice Schutz, Cathy Clem, Gary Streile and Marie Norton-Olsen.

Waxaa kaloo ka mid ah dadkii kobcinta buugaan wax ku darsaday, Gorsoore Sare, Philip Hubbard, Daniel Baxter, William Doyle Cecilia Camino, Kimberly Cisson and Kathy Santucci. Taas waxaa dheer adeegyadii ay qabteen hay'adaha dalka gudihiisa ayaa dhiiri geliyey waxyaalaha aasaaska u ah buugaan. Hay'adahaas waxaa ka mid ah hay'adda Itixaadka Qoysaska( Federation of Families.), xarunta wadanka ee qaabilsan caafimaadka maskaxda, Maxkamada Da'yarta, Cadaalada Dhalinyarada iyo Gudiga Wadanka ee loo yaqaan National Council of La Raza. Ururka John D. iyo Catherine T. MacArthur wuxuu bixiyey kharashkii mashruucaan, Jaamacada Washington qaybteeda Dabeecadaha Caafimaadka Dadweynaha iyo Qorshe Hawleedka Cadaaladda waxay kormeertay soo saarida mashruucaan.

Buugaan waxaa laga heli karaa bogga interneetka ee u gaarka ah Maxkamada Dhalinyarada ee Degmada King County ee cinwaankiisu yahay. http://www.kingcounty.gov/courts/JuvenileCourt/info.aspx

# TUSMADA BUUGGA

Hordhac ..... 1
Barnaamijyada cidii aan dambiile ahayn ..... 2
Maxkamada Dhalinyarada (Da'yarta) ..... 5
Yaad la kulmin ..... 8
Waa maxay Warbixintay tahay inaad siiso maxkamada ..... 13
Xayiraad (Xabsi) ..... 16
Habka Maxkamada ..... 19
Tijaabo ..... 30
Barnaamijyada Maxkamada iyo adeegyada ..... 33
Adeegyada Bulshada ..... 36
Dhalinyaro Nidaamo badan ku lug leh ..... 40
Qaamuus Yare ..... 42

## Ku soo dhawaw maxkamada dhalinyarada

Maxkamada dhalinyaradu waxay leedahay saddex ujeedo oo isku labalaaban

- Carbin
- In Qofka Dhalinta yar la saaro masuuliyada
- Hubinta nabadgalyada dadweynaha

Qof kasta oo ka qayb qaata habsocodka maxkamada waxa uu leeyahay shaqo go,an oo ay tahay in uu qabto si loo hubiyo in dhamaan saddexdaan hadaf la dhamaystiray.Marka hadafka habsocodkaan uu yahay in la gaaro natiijada ugu wanaagsan ee ay helaan bulshada iyo da'yartu, wuxuu habsocodkaan noqon karaa mid qoysasku ku wareeraan ama marmarka qaarkood u caal waayaan.

## Ujeedada Buugaan

Buugaan wuxuu ku hagayaa qoyskaaga dadka iyo habsocodka maxkamada, isla markaasna wuxuu kula socodsiinayaa edee-gyada ku caawinaya ee aad heli karto.Waxaa buugaan laga di-yaarshay talo ay ku taliyeen waalidiin iyo dhalinyaro soo maray habsocodka maxkamada hadda ka hor, waxaaana si gaar ah loogu dejiyey in uu ku siiyo warbaxinta muhiimka ah ee aad u baahantahay in ay ku caawiso markaad marayso waayo arragni-madaan. Buugaan waxaa loo dejiyey si ***isdhexgalid*** ah. Meelo badan baa ku jira oo aad ku qori karto xasuuso iyo balamo. Waxaan meelahaan banaan ugu darnay ka dib markaan wa-raysanay waalidiinta iyo dhalinyarada wixii ay u arkaan in ay anfacayaan ee buug sidaan oo kale ah laga helayo.

***Waalid***

***"Waxaan u malaynayaa nidaamka maxkamada sida uu hada yahay ma aha mid ebyoon.. .Hase yeeshee waxaan u malaynayaa gadaalbay dhabarkooda u laabaan si ay u hubiyaan in uu u noqdo ilmaha mid natiijo guul leh gaara."***

## Barnaamijyada Maxkamada Dhalinyarada ee u gaarka ah Cidii aan Dambi Gelin

Buug yarahaan  waxaa loogu talagalay in uu kugu haggo maxkamada dhalinyarada gudaheeda; hase yeeshee  Dhalinyarada oo dhan ma maraan waayo arragnimo maxkamadeed oo rasmi ah. Balse Ikhtiyaarada hoos ku qoran ayaa ah siyaalo kale oo dhalinyarada iyo qoysku ay ku lug lahaan karaan maxkamada dhalinyarada.

**Leexin:** Haddii qofka dhalinta yar yahay mid gala markii ugu horeysay danbi fudud waxaa laga yaabaa in loo dirro barnaamij leexineed. Leexinta degmada King County gudaheeda  waxaa loo yaqaan "ka qaybqaadashada  caddaalada dhalinyarada." Barnaamijkaan, qofka dhalinta yar waxuu la kulmayaa  Gudiga Masu'uuliyada bulshada ee loo yaqaan ,Community Accountability Board (CAB) asagoo kula kulmaya  meesha bulshadoodu degen tahay. Barnaamijkaan waxaa loo dhisay dhiirigelinta  masuuliyad ka ahaanshaha iyo kor u qaadidad macnaha bulshada iyo mas'uuliyada qofka dhalinta yar. Waxaa laga yaabaa in ay ku jiraan u adeegida bulshada, magdhaw iyo wax-qabadyo kale. Wixii faahfaahin dheeraad ah, taleefoon kula soo hadal  Barnaamijka  Iskaashiga Cadaalada Dhalinyarada (Partnership for Youth Justice) ee taleefoonkoodu yahay **206-296-1133.**

**Codsiga Ilmaha halista ku jira (ARY):** Codsiga ilmahaan halis buu ku jiraa waxaa diiwaan geliya qoyska u baahan in maxkamadu ka caawiso xakamaynta ilmahooda. Waxaa jira aasaasyo sharci ah oo ay tayhay in laga soo baxo si maxkamadu ay issaga soo qaado inay leedahay awooda xukumida arrintaan. Codsiyadaani ma aha kuwo la xariira dambi, waxaana mudadda ay maxkamadu u leedahay awooda xukumidooda gaartaa ilaa iyo ku dhawaad sided bilood. **Warbixin siyaado ah waxaad ka helaysaa bogga interneedka maxkamada dhalinyarada ee degmada King County oo cinwaankiisu yahay: http://www.kingcounty.gov/courts/JuvenileCourt/chins.aspx**

**Ilmo u baahan adeegyo (CHINS):** CHINS waa codsi laga diiwaan geliyo maxkamada si ilmaha loo geeyo meel degaan oo aan ahayn meesha ilmaha waalidkiis ama qofkii si sharci ah uga mas'uul ah uu degan yahay, sababtuna tahay in khilaaf culusi ka jiro dhexdooda. Aasaasyo sharci ah waa in laga soo baxaa si ay maxkamadu uga soo qoodo in ay leedahay awooda wax xukumida arrintaan. Waxaa diiwaan gelin kara codsiga CHINS waalidka, qofka dhalinta yar ama wakiilka DSHS.Waxaa mudada maxkamadu u leedahay awooda xukumida gaartaa ku dhawaad 8 billood. **Warbixin siyaado ah waxaad ka helaysaa bogga interneedka maxkamada dhalinyarada ee degmada King County oo cinwaankiisu yahay: http://www.kingcounty.gov/courts/JuvenileCourt/chins.aspx.**

**Iskuul ka maqnaansho:** Gobolka Washington, Degmada iskuulka ayaa laga rabaa in ay codsi ku saabsan googeysmo iskuul maxkamada Dhalinyarada ka diiwaan geliso haddii qofka dhalinta yari iskuulka ka maqnaado cudurdaar la, aan todoba jeer iyo ka badan bil gudaheed ama in ka badan to-bon goor oo maqnaansho cudurdaar la, aan ah sanad gudihiis. Maxkamadu waxay maraysaa hab looga gaarayo go'aan haddii ilmuhu u baahan yahay inuu maxkamad yimaado iyo haddii kale sabab codsi googeysmo dartiis. Mararka qaarkood cod-siyada la xariira googeysmoda iskuulka waxaa maamuli kara gudiga qaabilsan arrimaha googeysmoda iskuulka ee ka jira bulshada qofka dhalinta yari dagan yahay . **Warbixin siyaado ah waxaad ka helaysaa bogga http://www.kingcounty.gov/courts/JuvenileCourt/truancy.aspx, ama hadaad la xariirto dagmada iskuulka ee xaafadaada.**

**Maxkamada Dacwooyinka maandooriyaha:** Qofka dhalinta yar ee ku eedaysan inuu wax si uun uu u qaatay ama qaba dhibaato la xariirta isticmaal wax waxaa laga yaabaa in loo dirro Maxkamada Dacwooyinka Maandooriyaha. Maxkamada Dacwooyinka Maandooriyaha, qofka dhalinta yari wuxuu ka tanaasulaa xaquuqda uu u leeyahay garsoor maxkamadeed. Wuxuuna ka qayb qaataa barnaamij daaweeyneed oo maxka-madu ilaaliso. Haddii uu qofka dhalinta yari si guul leh u dhameeyo barnaamijka daaweynta, eedayntii asliga ahayd waa la baab'iyaa. Qofka dhalinta yar waxaa u diri kara maxkamada dacwooyinka maandooriyaha qareenkooda ama la taliyahooda tijaabada. **War bixin siyaado ah waxaad ka helaysaa bogga interneetka http://www.kingcounty.gov/courts/JuvenileCourt/juvdc.aspx.**

## Taariikhda Maxkamada Dhalinyarada

Maxkamadaha dhalinyarada waxaa markii ugu horaysay Marayka laga aasaasay dabayaaqadii qarnigii sagaal iyo tobnaad. markii ay isbedeldoonadii garawsadeen in dhalinyarada qaangaarni-madoodu wali dhiman tahay, ayna tahay in la siiyo fursad ay wax uga bartaan khaladaadkooda. Intaan Maxkamadaha Dhalinyara-da la samayn ka hor, dhalinyarada sharciga jabisa waxaa lagu xukumi jiray maxkamadaha dadka waaweyn iyadoo la raacayo sharciyada maamula dabeecadaha dadka waaweyn. Sannadkii 1967dii ayaa go'aankii Maxkamada Sarre ee *In Re Gault siiyay dhalinyarada difaaca sharciga ah ee la midka ah nidaamka xuquuq dhawrista ah ee maxkamada dhalinyarada. Kaasoo keenay in xuquuqdii dhalinyarada la difaacoy balse* ay wali ka gedisan tahay Maxkamadaha dadka waaweyn sababtoo ah:

- Danbiilenimada waxaa go'aankeeda gaara Garsoore ma gaaro gudi garsoore dadweyne iyo
- Ujeedooyinka maxkamada waxaa ka mid ah in qofka dhalinta yar la carbiyo.



## Xuquuqda Qofka Dhalinta yar

Waa wax aad u muhiim ah in la fahmo in aan waalidku xuquuq ku lahayn habsocodka maxkamada dhalinyarada. Qofka ku carrifan inuu ka jawaabayo dacwada (eedaysanaha), ee ah qofka dhalinyarada ah kaliye ayaa ah qofka kaliya ee ku leh xuquuq sharciga hoostiisa marka maxkamadaan la joogo. Xuquuqahaas waxaa ka mid ah:

- **Xaqqa ah in lagula socodsiiyo eedaynta**: Qofka dhalinta yar wuxuu u baahan yahay in uu ogaado waxa lagu soo oogay. Waxaa lala socodsiin waxa lagu soo oogay marka maxkamad la soo taago si uu u eedbaxo.
- **Xaqqa ah in uu leeyahay wakiil sharci**: Qofka dhalinta yar waxaa loo qabanayaa qareen difaaca si uu u masalo maxkamada dhexdeeda, qareenkaas wuxuu kala hadlayaa qofka dhanlinta yar dacwada wuxuuna kula talinayaa waxyaalaha u kala banaan.
- **Xaqqa ah in uu su'aalo waydiiyo markhaatiyaasha: haddii** qofka dhalinta yar aado garsoor maxkamadeed /dhegeysi maxkamadeed oo xaqiiqo raadin ah ( inta badan ma dhacdo) qareenka difaaca ayaa laga yaabaa in uu markhaatiyaasha uu keenay xeer ilaaliyuhu su'aalo weydiiyo.
- **Xaqqa ka soo horjeeda in uu neftiisa marag ku furo**: Dhalinta waxaa laga yaabaa inaan looga baahan in ay isku markhaati furaan.

## Kaalinta waalidka

Markaysan waalidiintu xuquuq sharci ah ku lahayn habka maxkamada dhalinyarada, waxay yihiin weli kuwo qayb muhiim ah kaga jira habkaan. Waalidku waxay warbixin siiyaan qareenka difaaca iyo la taliyaha tijaabada si ay uga caawiyaan garsooreha in uu go,aan ka gaaro nooca daaweynta iyo ciqaabta ee uu ku amrayo qofka dhalinta yar.Taas waxaa dheer, waalidku waa asalka

dhiiri gelinta kaasoo muhiim u ah ilmahooda marka habkaan soc-do, waxaana lagu dhiiri gelinayaa in ay yimaadaan dhegaysiyada maxkamada.

## Daboolista Warbixinta Diiwaanka ku jirta

Gobolka Washington gudihiisa , arrimaha maxkamada caruurtoo dhami waxay galaan diiwaanka qoran ee dadwaynaha. Tan mac-naheedu waa , xataa eedaymaha lidka ku ah qofka dhalinta yar ee la diiwaan geliyey waxay u banaan yihiin in ay dadwaynuhu heli karaan. Qofka dhalinta yar marka lagu helo in uu dambiga galay ee uu joogo maxkamda dhalinyarada dhexdeeda waxaa la yira-ahda waa la xukumay ama xukumid baa ku dhacday. Xukumidaas oo marka la eego aqoonta farsamo aan ahayn xukumis danbiile lagu xukumay. Inkastoo ay saas tahay xukumiddu way saamayn kartaa qofka dhalinta yar, waxayna ka saameyn kartaa inuu shaqo helo. Qofka dhalinta yari waa dabooli karaa warbixinta diiwaanka ugu jirta haduu ka diiwaan geliyo maxkamada codsi taas ku saabsan , taasi waa hadduu xaq u leeyahay daboolistaas marka la fiirsho taariikh danbiyeedkiisa. Haddaad jeceshahay warbixin siyaado ah oo ku saabsan daboolista warbixinta qoraal-ka ah ee diiwaanka ku jirta, la xariir hay'addaha:

**Dadka si sharci ah u difaaca dhalinyarada wadooyinka ee Washington ee loo yaqaan Street Youth Legal Advocates of Washington (SYLAW) (206-659-5029, http://sylaw.org)**

**Xafiisyada kooxda caruurta ee loo yaqaan TeamChild offic-es ee ku yaala degmooyinka, King, Spokane, Benton-Franklin, Snohomish, iyo Pierce. (206-322-2444, www.teamchild.org).**

Cid kasta oo ku lugleh maxkamada dhalinyarada waxay ka cayaartaa door muhiim ah in lagu guulaysto haddafka saddexda waji ah ee maxkamada: Carbinta , in masu'uuliyada la saaro qofka dhalinta yar, iyo in la hubiyo nabadgelyada dadweynaha. Waxaan ka hadli doonaa kaalinta uu ka cayaaro hadafkaan midkasta oo ka mid ah dadka ku lug leh maxkamada dhalinyarada. Sidoo kale waxaan culayska saaraynaa waxa aad u baahan tahay in aad og-aato si aad si wanaagsan oo xaqiiqo ah ula shaqayso shakhsiyaadkaan

## Qareenka Difaaca

Magaca Qareenka difaaca Qofka Dhalintayar _______________

Taleefoonka Qareenka Qofka Dhalinta Yar: ________________

Kaalinta qareenka difaacu waa in uu masalo qofka dhalinta yar markuu joogo maxkamad horteeda. Waa in uu hubiyo in xuquuqda sharciga ee qofka dhalinta yar la ilaaliyo, inuu kula taliyo qofka dhalinta yar ikhtiyaarada u kala banaan ee ay ku xalin karaan kiiskooda. In kasta oo ay jiraan waqtiyo uu qofka dhalinta yari la kulmo qareenkiisa intaanu maxkamada imaan, waa wax inta badan dhaca in qofka dhalinta yari marka ugu horaysa kula kulmo qa-reenkiisa qolka sugitaanka ee maxkamada ka hor intaan la gaarin balanta dhageysiga ugu horeeya maxkamada kiiskiisa. Qareenku caadatan wuxuu ula hadlaa dhalinta yar si gaar ah mar uun ka mid ah mararkuu la kulmo qofka dhalinta yar. Maadaama qareenka difaacu uu matalayo qofka dhalinta yar,waxaa laga yaaba in qa-reenka difaacu u sharxo ama uusan u sharxin waalidka hab so-codka maxkamada. Badankood waxay waalidka kala hadli karaan waxay awoodaan haddii aanay ahayn warbixin sharci ah oo sir ah iyo haddii ay si kale u haboon tahay inay kala hadlaan waxaas..

## Xeer ilaaliye Dagmo

Kaalinta xeer ilaaliyaha degmada waa in uu hubiyo in nabadgalyada dadweynaha la difaacay. Tan waxay u samaynayaan ayagoo eedayn ku soo ooga qofka dhalinta yar oo soo jeediya waxa ay la tahay ciqaabta ku haboon. Xeer ilaaliyaha degmadu inta badan marba qof kale oo ka gedisan kii hore ayuu noqon karaa dhegaysigii maxkamadeed oo kasta. Qofka dhalinta yar iyo qoysku caadatan wax xariir ah oo banaanka maxkamada uga baxsan lama lahaanayaan xeer ilaaliyaha degmada, hase yeeshee, qareenka difaaca iyo xeer ilaaliyaha degmadu waxay kawada tashadaan midda ku saabsan xalka haboon ee u gaarka ah kiiska qofka dhalinta yar. La xariir xafiiska xeer ilaaliyaha ee degmada King County, Qaybta dhalinyarada: **King County Prosecutor's Office Juvenile Section (206-296-9025).**

## Garsooraha

Garsooruhu wuxuu gudoomiyaa dhagaysiga maxkamada si uu u hubiyo in hab sharciyeed haboon la maray. Sidoo kale wuxuu ka go'aamiyaa natiijada ka soo baxda kiiska. Garsooruhu wuxuu ka gaaraa go'aan in qofka dhalinta yar uu sii xirnaado iyo in kale, in qofka dhalinta yar ku yahay danbiile danbiga lagu soo oogay iyo in aanu danbiile ku ahayn iyo waxa lagu amrayo qofka dhalinta yari in uu sameeyo. Qofka dhalinta yar iyo waalidku lama xariirayaan Garsooraha wixii banaanka uga baxsan dhagaysiga dacwada. Wixii warbixin ah oo la rabo in la siiyo Garsooraha waa in loo dhiibaa la taliyaha tijaabada, kaasoo warbixintaas qofka dhalinta yar ku saabsan soo koobaya oo u soo jeedinaya garsooraha la talin la xariirta ikhtiyaarada u kala banaan dhalinta yar ee lagu daaweynayo.

## La Taliyaha tijaabo siideynta

Magaca la taliyaha tijaabo siideynta ee qofka dhalinta yar:

_______________________________________________

Phone number: __________________________________

La taliyaha tijaabo siideyntu wuxuu u shaqeeyaa maxkamada, uma shaqeeyo garsooraha iyo qareenka midna. **Dhamaan da'yar-ta marta habsocodka maxkamada dhalinyarada waxaa loo xilsaaraa la taliye tijaabo siideyn, xataa haddii aysan ku jirin tijaaabo siideyn.** La taliyaha tijaabo siideynta wuxuu bi-xiyaa warbixin ku saabsan habsocodka maxkamada sidoo kale wuxuu aruuriyaa warbixinta ku saabsan taariikhda qofka dhalin-ta yar, waxyaaluhuu ku fiican yahay iyo waxyaaluhuu u baahan yahay. La taliyaha tijaabadu wuxuu warbixintaan la wadaagayaa garsooraha wuxuu kaloo la taliyaha tijaabadu u soo jeedinayaa garsooraha talo ku saabsan in qofka dhalinta yar ka faa'iidaysa-nayo mid ka mid ah barnaamijyada daawaynta ee maxkamada. La taliyaha tijaabo siideyntu waa qofka ugu wanaagsan ee ay wey-diin karaan wixii su,aal ku saabsan habsocodka maxkamada ee ay qabaan.

## La taliyaha siideynta ee qaabilsan maaraynta da'yarta

Name of youth's Supervision JPC:

______________________________________________

Phone of youth's Supervision JPC:_________________

La taliyaha tijaabo siideynta ee qaabilsan maaraynta qofka dhalinta yar (JPC) wuxuu la shaqeeyaa qofka dhalinta yar **haddii la galiyo tijaabo**. JPC wuxuu la kulmaa qofka dhalinta yar iyo qoyska ugu yaraan bishii mar si uu u hubiyo horusocodka iyo in ilmuhu ka soo baxayo sharuudihii tijaabo siideyntiisa/siideynteeda. Waalidka waxaa aad loogula talinayaa in ay joogaan kulamadaan oo ay u sheegaan dabeecadaha wanaagsan iyo kuwa dhibta abuuraya ee qofka dhalinta yar. Wada sheekaysiyadaan lala sheekaysanayo la taliyaha tijaabo siideyntu ma ahaanayaan kuwo qarsoodi ah waxaana loo adeegsan karaa in eedayn cusub lagu soo oogo iyo in isbedelo lagu sameeyo tijaabo siideynta.

**Waalid**

**"Waxaan u malaynayaa aad bay muhiim u tahay in waalidku joogo marka ilmuhu la kulmayo la taliyihiisa tijaabo siideynta"**

## Shaqaalaha kale ee maxkamada

**Adeegyada maxkamada**: Shaqaalaha adeegyada maxkamada waxay maamulaan shaqooyinka maxkamada ee maalin walba. Markaad maxkamada tagto waxaad iska xaadirinaysaa miiska warbixinta qofka jooga ee adeegyada maxkamada qaabilsan.

**Socodsiiyaha Maxkamada**: Socodsiiyaha maxkamadu wuxuu u kaxeeyaa ama ka soo kaxeeyaa qofka dhalinta yar meesha lagu hayo marka uu dhageysiyo maxkamadeed leeyahay.

**Garaaniga maxkamada** Garaaniga maxkamadu wuxuu jooga maxkamada gudaheeda marka dhegeysiyada maxkamadu soconayaan

Waxaan bogga soo socda ku qoraynaa qormo tusaale ah oo tilmaamaysa nooca warbixinta caawimaada leh ee aad la wadaagi karto la taliyaha siideynta ee loo yaqaan JPC.Hadii aanu qofka dhalinta yar ka soo baxayn sharuudihii tijaabada siideynta sidii ku xusnayd amarka maxkamada, qofka JPC ah wuxuu ku fakari karaa in uu dhigo dhageysi maxkamadeed oo wax looga bedelayo jitaabada maxkamad garsooraha hortiisa ah. Hase yeeshee, waxaa dhinacyada oo dhan u wanaagsan haddii arrinta la xalin karo in la xaliyo ayadoo aan qofka dhalinta yar dib loogu soo celin maxkamada gudaheeda.Waalidiinta waxaa lagu dhiiri galinayaa in ay si wada shaqayn leh ula shaqeeyaan la taliyaha tijaabo siideynta (JPC) si loo helo habab shaqaynaya oo lagu dhiirigelinayo qofka dhalinta yar in uu u dhaqmo si wanaagsam.

## WAA MAXAY WARBIXINTAY TAHAY INAAD SIISO MAXKAMADA

Hoos waxaa ku qoran liis laguu soo jeedinayo waxa uu noqon karo noocyada warbixinta caawimaada leh ee waalidku ka bixin karaan qofka dhalinta yar inta maxkamadu socoto. Waxaan ku talinaynaa qor oo daabac warbixintaan oo sii koobbi la taliyaha tijaabo siideynta. La taliyaha tijaabo siidayntu wuxuu waraystaa waalidka iyo qofka dhalinta yar marka haddii jawaabuha diyaar kuu sii yihiin intuusan ku waydiin ka hor, waxay dadajin kartaa hawlsocodkaan.

- Dawayn noocee ah, ciqaab noocee ah ama natiijo ka soo baxda oo maxay ah baad u malaynaysaa in ay caawimayso qofka dhalinta yar?
- Maxaad ogaatay ee u noqon kara qofka dhalinta yar wax si guul leh u dhiiri gelin kara?

## Taariikhda Qoyska

- Qofka dhalinta yari yuu hadda la nool yahay?
- Waa sidee xariirka qofka dhalinta yari la leeyahay xubnaha qoyska? Si khaas ahse ma ula leeyahay/ma ula leedahay xariir xoogan mid ka mid ah xubnaha qoyska?
- Qofka dhalinta yari waligiis guriga ma ka cararay? Imisa goor?
- Qoyskaagu hadda ka hor ma ka qayb qaatay wax daaweyn qoys ah ama barnaamijyo la talin ah?
- Sideebaad ku tilmaamaysaa xariirka aad la leedahay qofka dhalinta yar?
- Ma danaynaysaa inaad ka qayb qaadato barnaamij lagu dawaynayo qoyska oo culayska la saarayo dabeecadaha qofka dhalinta yar?

## Taariikhda Iskuulka

- Qofka dhalinta yar si joogto ah ma u tagaa iskuulka? Haddaanu u tagin, goormuu bilaabay/goormay bilowday in uu iskuulka tago/tagto in ka  yar in joogto ah?
- Ma jiraan wax maadooyin ah ama nashaad iskuulka ah ee qofka dhalinta yar ku guulaystay. Muxuu/maxay jecelyahay/jeceshahay ama ku fiican yahay/ku fiicantahay?
- Qofka dhalinta yar ma lahaa wax arrin caafimaad ah oo ku adkeeyay in uu iskuulka tago ama nashaadyada kale ka qayb qaato?

## Wax taariikh ah oo ku saabsan caafimaadka maskaxda/ si xu u isticmaal wax?

- Hadii qofka dhalinta  yari uu hadda isticmaalayo waxyaalo sharci daro ah oo aan la ogolayn sidda (aalkolo iyo daroogo) goormuu bilaabay/goormay bilowday inuu isticmaalo ama inay isticmaasho? Goormaad bilowday inaad  dareento isbedel dabeecadooda ah?
- Qofka dhalinta yar ma lagu sheegay arrin la xariirta caafimaadka maskaxda in uu qabo?
- Qofka dhalinta yar hadda ma helaa daaweyn la xariirta arrinta caafimadka maskaxda? Qofka dhalinta yar daaweyn hadda ka hor ma helay?
- Qofka dhalinta yar hadda ma qaataa  wax dawooyin ah oo la xariira arrinta caafimaadka maskaxda? Haday jawaabtu tahay haa, waa maxay dawooyinkaas?


# WAA MAXAY WARBIXINTAY TAHAY INAAD SIISO MAXKAMADA

## Xariiradda

- Ma dareemaysaa in saaxiibadda qofka dhalinta yar ay yihiin kuwo saameyn xun ku leh iyadda ama assaga
- Qofka dhalinta yari ma leeyahay saaxiibo ah kuwo saameyn wanaagsan ku leh?

## Caawimaad iyo Awood

- Waa ayo dadka saamaynta wanaagsan ku leh qofka dhalinta yar noloshiisa ee uu tusaale ka soo qaato ama ay ka soo qaadato?
- Qofka dhalinta yar ma ka qayb qaataa wax koox ah oo bulsho, iskuul ama masaajid oo ah meel uu markuu tago wax wanaagsan ka siyaadsado/ama ka siyaa-dsato.
- Muxuu qofka dhalinta yari ku fiican yahay?



Xabsi gaaban waa meel dhismo ah oo xirran oo dhalinyarada laga yaabo in ay joogaan markay sugayaan dhegaysiyadooda maxkamada ama xukun xarrig ah gudanayaan. Xabsi gaaban in la aado marka ugu horaysa waxay  u noqon kartaa waalidka iyo ilmahaba waaya arragnimo cabsi leh taasi waa markaysan aqoon waxay filaan. Caawimaad bay leedahay haddaad ogaato waxyaalaha looga baahan yahay xabsigaan gaaban in uu ka soo baxo ama xeerka sharcigga ah  ee xadidaya waxyaalaha looga baahan yahay xabsigaan ee ku saabsan xagga nabad gelyadda, cabirka, caafimaaadka iyo madadaalada. Liiska hoos ku xusan wuxuu taxayaa barnaamijyada xabsiga gaaban qaarkood, xarrumaha  iyo qawaaniinta xabsigga gaaban.

**Saacadaha booqashada:** Waalidiinta/dadka si sharci ah masuul uga ah ilmaha waxay soo salaami karaan ilmaha saddex jeer asbuucii. Walaalaha da, doodu ka yartahay sideed sanno , ayagana waa la ogalyahay. Dadka kale ee soo booqanaya qofka dhalinta yar  waa in ay yihiin kuwo la taliyaha tijaabo siideyntu dalbaday  uuna ogalaaday Madaxa Xabsigga gaaban. Saacadaha booqashadu waa 3:30galabnimo illaa iyo 9:00fiidnimo ee maalmaha shaqada ee asbuuca (Isniinta illaa iyo Jimcaha) iyo  9:00 subaxnimo ilaa iyo 9:00Fiidnimo  maalmaha fasaxa ee asbuuca (Sabtida iyo Axada) iyo maalmaha faaystooyinka loo aqoonsanyahay halkaan.(Marka laga reebo 2:30-3:30galabnimo).

**Taleefoonka:** Qofka dhalinta yar waxaa loo ogol yahay in uu taleefoon dirsaddo laakiin waa in shaqaaluhu u ogolaado. Taleefoonadu waa kuwo qofka loo dirayo lacagtooda bixinayao lacagtooduna waa $2.10 (Meel fog $2.50 iyo  .08 to .10 daqiiqadii  iyo canshuurta lagu dalaco).  Taleefoonku  si ootomaatik ah ayuu isu xirayaa 15 daqiiqo ka bacdi. Daqiiqadaha horay lacagta loo bixiyeyna  waxaa laga iibsan karaa  ayadoo la marayo shirkada Custom Teleconnect Inc. (CTI)

**Warqadaha:** qofka dhalinta yar wuu heli karaa wuuna diri karaa warqado xabsigga gaaban dibadiisa ku socda am ka yimid.Warqadaha u imaanaya waxaa laga baarayaa wixii mamnuuc ah (waxyaalaha aan la ogolayn in xabsigga gaaban lagu dhex haysto). Wixii boostadu keento ee qofka dhalinta yar aan loo ogolayn in uu ku dhex haysto xabsigga gaaban waxaa lagu ridayaa meesha alaabtoodu ku jirto. Cinwaanka xabsigga ee qofka dhalinta yar loogu soo diri karo warqadaha waa:

**Juvenile Detention**
**Youth's name**
**1211 East Alder**
**Seattle, WA 98122**

**Adeegyada Caafimaadka:** Xarunta xabsigga gaaban ee degmada King County waxay leedahay bukaan socod eegto leh kalkaaliye caafimaad oo saacaddo buuxa ka shaqeeya, koox khubaro ah oo qaabilsan caafimaadka maskaxda, Dhakhtar guud oo arka qofka dhalinta yar hadduu bukoodo ama dhaawac gaaro. Qofka dhalinta yar wuxuu dalban karaa inuu arko kalkaaliyaha caafimaadka ama shaqaalaha caafimaadka maskaxda mar alla markuu doono. Warbixinta caafimaadka iyo midda caafimaadka maskaxduba waa mid khaas ah waxaana kaliya oo lagu wadaagi karaa iyadoo la raaco qodobo addag oo aan la gudbi Karin.

<u>Daawooyinka qofka da'da yar leeyahay waa in lagu keeno dhalo dhakhtar qoray oo warqad yar oo muujinaysa sida loo isticmaalo dusheeda si caadi ah ugu dhegen tahay, waana in warqada dhakhtarku qoray ay tahay mid xiliga la joogo ah oo aan dhicin.</u>

Qofka dhalinta yar ee xabsigga yar ku jirra wuxuu helayaa:

- Saddex cunno maalintii iyo fiidkii oo la siinayo cunto-fudud
- Dhar nadiif ah
- Waxyaaluhuu isku nadiifin lahaa

- Fursado uu maalin walba jimicsi jirka ah ku sameeyo
- Barnaamij wax barasho oo maalin walba ah
- Fursad qubeys oo maalin walba ah, musqul uu isticmaali karo iyo tuubo biyood haddii loo baahdo.
- Fursad ay ku tagaan adeeggii diiniga ah ee ay doonaan.

Si loo yareeyo caddadka dhalinyarada ku jirta xabsigga yar, laakiin wali loo barro sidday masuuliyadda u qaataan, waxaa meesha xabsigga yari maamushaa **Barnaamij Badal Xabsi Yare la Illaaliyo oo loo yaqaan (ASD).** Barnaamijkaan, qofka dhalinta yar waxaa garsooruhu u diraa in uu ka qayb galo mid ka mid ah ikhtiyaaradda hoos ku xusan ee kala gedisan. Ikhtiyaaradaan waxaa ku jirra waxyaalaha soo socda:

**Ilaalo joogto ah oo elektroonik ah:** Waa nooc xabsi yar ah.Qofka dhalinta yar waxaa lagu rakibin ilaaliye joogto ah oo qoobka looga xirrayo. Waxaa ilaaliyahaa lagu buuxiyaa in uu soo gudbiyo baaq haddii qofka dhalinta yar uu u dhaqaaqo meel ka baxsan xuduudii loo xaddiday.

**Daryeelka Kooxda:** Waa nooc xabsi yar ah. Waa meel guri koox ku nooshahay ah oo 24ka saac la ilaaliyo. Dhaqdhaqaaqa gurriga banaankiisa ah shaqaalaha ayaa ilaaliya.

**Is xaadirin maalin walba ah:** Waa barnaamij wax barasho oo qofka dhalinta yar uu helo duruus waxbarasho oo khaas ah oo uu ku dhex qaato fasal wabsarasho oo yar.

**Is xaadirin fiidkii ah:** Waa barnaamij iskuulka marka laga soo baxo ka bacdi qofka dhalinta yar uu hello daruus iyo adeegyo ku saabsan xirfaddaha nolosha.

**Is xaadirin maalmaha fasaxa asbuuca:** Waa barnaamij qofka dhalinta yar uu tagoo laba maalin oo fasaxa asbuuca ah oo buuxa daruus lagu bixiyo dhismaha dhalinyarrada. Tan waxaa caadatan loo isticmaalaa ciqaabta u gaarka ah jabinta sharuudaha tijaabo siideynta ama bedel xabsi yare la ilaaliyo haday la xariirto xukunka kiiska.

## Hawl socodka Maxkamadda

Hawl socodka maxkamadda dhalinyaradu wuxuu qaadan karaa dhawr asbuuc ama dhawr bilood. Waxaa jirra dhagaysiyo maxkamadeed oo la tagayo taasoo ku xirran balan dhigista iyo waxyaalo kale. Waxaa laga yaabaa in balamahaas ay u dhaxeeyaan asbuucyo. Sidoo kale marka qoysku maxkamadda yimaado oo ay u yimaadaan balantooda dhagasiga maxkamada, waxaa laga yaabaa in ay sugaan saacaddo fara badan intaan maxkamadda gudaheeda looga yeerin.


Cid waliba waxay korarsan waayo arragnimo nadir ah; marmarka qaarkood laba iyo ka badan dhegeysiyadaas maxkamadda ayaa dhaca isla maxkamadaa tegideeda. Mar marka kale dhagaysi kasta oo maxkamadeed wuxuu noqdaa tegis kale oo maxkamadeed. Sidoo kale, dhegeysiyada maxkamadda qaarkood waxay ku dhacaan qolka maxkamadda gudihiisa, qaar kalena waxayy ku dhacaan qolka sugitaanka. Boggaga soo socda ayaa soo koobaya ujeedooyinka laga leeyahay dhagaysiyadda maxkamadeed ee kala gedisan ee laga yaabo in ay ku soo maraan. Waxaan kaloo boggagaas ku darnay meelo ban banaan oo aad ku qorato xusuusaha iyo su,aalaha laga yaabo in aad isweydiiso marka dhagaysigga maxkamaddu soconayo iyo sidoo kale marka balanta kale ee dhegaysigga maxkamadda la dhigo. Maadaama dhegeysigga maxkamaddu uu dhakhso u socon karo, waa fikrad wanaagsan in aad su'aalahaagga qorato si aad u xasuusato in aad weydiiso qareenka difaaca iyo la taliyaha tijaabo siidaynta qorra markaas ka bacdi.

## Naseexooyin ku saabsan markaad tagayso dhegeysigga maxkamada.

**Labiska:** Labiska haboon ee maxkamada lagu tago waa mid ka fog middabada iyo waxyaalaha la isku qurxiyo ee la xariiraa qawlaysato ama labis dacaayad u ah isticmaal darooggo ama alcohol, dharka jiifka, gacmo gooska iyo dharka aadka guri jooga u ah ama jirka si aan haboonayn u muujinaya. Inkastoo garsooreyaashu go'aamaday gaarayaaan ku saleeyaan mudnaanaha kiiska, waxaa rayigooda saameyn kara sida qofka da'ada yar ama waalidku u labisan yahay. Dhalinyarada xabsigga yar ku jirta waxay dhegeysiyadda maxkamadaha tagaan ayagoo dharka caadatan xabsigga yar lagu qaato xiran.

**Hubka:** Hubka, sida qorigga, mandida, iyo wixii kale oo hub u eg lama ogola maxkamada dhexdeeda. Dadka maxkamadda gelaaya oo dhan waxaa lagga rabaa in ay bir sheegaha maraan.

**Dabeecadda:** Dadka maxkamadda agteeda joogga waa in ay ka dheeraadaan dabeecadaha dadka agagaarkooda ah dhibsan karaan ama keeni kara in wax gaaraan dhismaha maxkamadda sida caytan, qaylo, candhuuf tufid, dhagaysi muusiko cod dheer ah, wax ku qorid iyo dhawris la, aan aan la dhawrin allaabta iyo waxyaalaha kale ee lagu adeegto. Shaqaalaha illaalada ayaa joogga maxkamada si ay u fuliyaan sharciyada ku saabsan arrimahaan.



## Noocyadda dhegeysiyadda maxkamadaha

Boggaga soo socda waxa ay soo koobayaan noocyadda dhegaysiyada maxkamaddaha ee laga yaabo inaad xaadirto. Meelo buug yarahan ah ayaan kuu banaynay si aad ugu qoroto wixii xasuus ah iyo balanta dhegeysigga maxkamadda ee kale ee kaas ku xigga. Dhegeysiyadda maxkamadda laga yaabo in qofka dhalinta yar xaadirro waxaa la yiraahdaa:

- Hor istaaga koowaad ee maxkamadda
- Hor istaaga labaad ee maxkamadda
- Oogis Dacwo/ la socodsiin kiis
- Dejinta kiiska
- Garsoor/dhagaysigga xaqiiqo raadinta
- Dhageysiga Xalinta Kama dambaysta ah ee kiiska qirashadda
- Magdhow
- Wax ka bedellid
- Dib u eegis xirnaansho
- Falanqayn
- Karaan
- Awood



## HOR ISTAAGA KOOWAAD EE MAXKAMADDA

**Hadaf:** Dhegeysigaan wuxuu dhacaa maalinta maxkamadda ee ku xigta maalinta da'yarta la keeno xabsi yaraha ayadoo la tuhmayo in denbi la galay.

**Natiijada:** Marka horre , waxaa garsooruhu ka go'aamiyaa in maxkamaddu haysato warbixin ku filan si ay awood inay ku leedahay qofka dhalinta yar carrabka ugu dhufato. Haduu garsooruhu ogaada in taasi sax tahay, garsooruhu wuxuu go, aan ka gaaraa in qofka dhalinta yar xabsi yaraha lagu hayo ama uga baahdo qofka dhalinta yari in uu raaco sharuudo maxkamadu amartay haddii la sii daayo. Xeer illaaliyuhu wuxuu leeyahay muddo go'an oo uu dacwadda ku soo oogo( Marka ugu danbaysa ee kiiska la soo oogi karo) inta maxkamad-du gacanta ku hayso qofka dhalinta yar.

## HOR ISTAAGA LABAAD EE MAXKAMADDA

**Hadaf:** Marka hor istaaga koowaad ee maxkamaddu socdo, ayaa waxaa la dhigaa balan kale oo la soo hor istaago maxkamadda haddii eedaymaha la diiwaan geliyo.

**XUSUUSO/SU'AALLO:**

**TAARIIKHDA DHAGAYSIGA KAN KU XIGGA**

________________________________________

# MAXKAMAD SOO TAAGIS EEDAYSANNE SI UU U DACWO BAXO

**Hadaf:** Maxkamad soo taagis qof eedaysanne ah si uu u dacwo baxo waa marka qofka dhalinta yar si rasmi ah loola socodsiiyo eedaynta lagu soo oogay. Waxaa tan lagu samayn karaa ama maxkamadda gudaheeda ama maxkamadda dibadeeda taasoo ku xiran culayka eedaynta. Siday caadatan u dhacdo waa in qofka dhalinyarada ahí yiraahdo "danbiille ma ahi" ama "ma qabo eedaan". Sidatani waxay siinaysaa qofka dhalinta yar iyo qareenkiisa difaaca waqti ay ku wada hadlaan intaan qofka dhalinta yari go'aan ka gaarin siddii uu ku xalin lahaa kiiska.

Danbiyadda fudud, maxkamad soo taagista qofka eedaysanaha ah si uu u dacwo baxo waxay ka dhacdaa maxkamada meesha laga soo galo maxkamada taasoo dhexmarta qofka dhalinta yar iyo qareenka difaaca badalkii ay ka dhici lahayd qolka maxkamadda gudihiisa oo garsoore la hor istaagi lahaa.

**Natiijo:** Dhegeysigga kan ku xigga waa fariisin kiis, oo balanteeda la dhiggo.

**XASUUS/SU'AALLO:**

**TAARIIKHDA DHEGEYSIGGA KAN KU XIGGA**

________________________________________

# FARIISIN KIIS

**Hadaf:** Dhegeysigga fariisinta kiiska wuxuu dhex maraa qofka dhalinta yar iyo qareenka difaaca wuxuuna ka dhacaa meesha lagga soo galo maxkamadda. Qareenku wuxuu u badan yahay in uu la hadlo qofka dhalinyarada ah keligiis markay socdaan qaybaha kulankaan qaarkood. Ujeedada kulankaan waa in qofka dhalinta yar iyo qareenku ka wada hadlaan kiiska iyo in qareenka difaacu kala taliyo dhalinyarada qofka ah waxyaabaha u kala banaan ee uu kala dooran karo iyo in uu ku caawiyo qofka dhalinta yar in uu go'aan ka gaaro ikhtiyaarkii uu qaadan lahaa.

**Natiijadda:** Qofka dhalinyarada ah ayaa asaga oo uu caawinaya qareen, go'aan ka gaara hadduu qiranayo denbigga in uu galay iyo hadduu doonayo in uu balan maxkamad garsoor dhigto ama uu dib u dhigo dhegeysigga maxkamada si uu diyaar garow siyaado ah ugu sii diyaar garoobo. Sidda hadba go'aankaan noqdo, waxaa qareenka difaacu dhigaa balan maxkamad garsoor, balan taariikh cusub oo dacwada la fariisinayo ama balan qirasho danbi.

**XUSUUSO/SU'AALLO:**

**TAARIIKHDA DHEGEYSIGGA KAN KU XIGGA**

________________________________________

# DHAGAYSIGA XAQIIQO RAADINTA/MAXKAMADA GARSOORKA

**Hadafka:** Dhagaysiga Xaqiiqo Raadinta/ Maxkamada Garsoorka waa dhagaysiga maxkamada Kaasoo uu garsooruhu go,aamiyo in qofka dhalinta yar dambiile yahay ama aanu ahayn. Qofka dhalinta yar kuma ahaan karo danbiile danbiga ilaa inuu garsooruhu ku helo in uu dambiile yahay /dambiile tahay mooyee. Si garsooruhu ugu helo qofka dhalinta yar danbiile , xeer ilaaliyuhu waa in uu keena cadayn ku filan oo muujinaysa in si aan shaki ku jirin in qofka dhalinta yar danbiile ku yahay danbiga. Ma jiraan xubno garsoore dadweyne maxkamada dhalinyarada, waxa natiijada go,aan keeda gaara garsooraha.

**Natiijo:** Garsooraha ayaa ka go,aaminaya in qofka dhalinta yar yahay danbiile iyo in aanu ahayn danbiile. Hadii lagu helo in uu denbiile yahay, dhagaysiga maxkamada ee kaas ku xigga waxa uu noqonayaa dhagaysiga maxkamada ee u gaarka ah dejinta dacwada.

**XUSUUSO/SU'AALLO:**

**TAARIIKHDA BALANTA DHAGAYSIGA MAXKAMADA KAN KU XIGGA**

# DHEGEYSIGA XALINTA KAMA DAMBAYSTA AH EE KIISKA

**Hadaf:** Dhagaysigaan maxkamada, waxaa garsooruhu dhageystaa faahfaahinta kiiska qofka dhalinta yar wuxuuna amraa shuruudo taxan oo laga doonayo qofka dhalinta yari in uu fuliyo.Shuruudahaan waxaa la yiraahdaa amarka xalinta kama dambaysta ah ee Kiiska (disposition).

**Natiijo:** Amarka xukunku wuxuu carifaa waxa ay tahay in uu sameeyo qofka dhalinta yar si uu si guul leh u dhamaystiro hawl socodkiisa maxkamada dhalinyarada. Garsooruhu wuxuu tix geliyaa waxa ka caawinaya qofka dhalinta yar in uu masuuliyada qaato, waxa ilaalinaya nabadgalyada bulshada, waxa caawinaya carbinta qofka dhalinta yar. Waxaa ku jiri kara amaradda xukunka la talin, tijaabo siideyn, bulsho u adeeg, magdhaw (lacag la soo gudo) iyo muddo xabsi ah. Ikhtiyaaradaa qaarkood waxaa si faahfaahsan looga heli karaa qaybta tijaabo siideynta ee buugaan gacan qabsiga ah iyo sidoo kale qaamuus yareha. Haddaan amarka xukunka la raacin, qofka dhalinta yar waxaa dib loogu soo celin karaa garsooraha hortiisa kaasoo laga yaabo in uu amro ciqaabo kale oo dheeraad ah. Qofka dhalinta yar waxaa la siinayaa koobbiga amarkaan xukunka ka dib markuu dhamaado dhegeysiga u gaarka ah xukunka.

**XUSUUSO/SU'AALLO:**

**TAARIIKHDA DHAGAYSIGA MAXKAMADA KAN KU XIGGA**

________________________________________

## DHAGAYSIYO MAXKAMADEED OO KALE

### Dib u eegista xabsigga

Dhagaysiga maxkamada ee dib u eegista xabsigga waxaa la qabtaa mar kasta oo qof qayb ka ah dacwadaan uu doonayo in uu wax ka badalo xaalada xabsigg qofka dhalinta yar, sida, in la dalbado in qofka dhalinta yar laga siidaayo xabsigga, in la dalbaddo in qofka dhalinta yar la dhigo xabsigga, ama in la dalbado in qofka dhalinta yar ee xirran la galiyo xanibaad ka khafiifsan tuu ku jiro

### Dhagaysigga maxkamada ee Magdhowga

Marka qofka dhalinta yar lagu amro in uu bixiyo magdhaw (dib u bixiyo lacag u gaar ah khalad uu sameeyay), Dhagaysiga maxkamada ee magdhawgu waxaa laga yaabaa in garsooraha loo dhigo si uu uga go, aamiyo qiimaha haboon ee magdhawga la bixin doono uu yahay.

### Dhagaysiga wax ka badalida (Dhagaysiga Tijaabo siideynta)

Dhagaysiga maxkamadda ee wax ka badelida wuxuu dhacaa marka la taliye tijaabo siideyn uu dalbado qofka dhalinta yar ee ku jirra tijaabo siideyn in uu mar kale garsooruhu arko. Tan caadatan waxay u dhacdaa waayo qofka dhalinta yar ayaa jabiyey mid ama dhamaan sharuudihii tijaabo siideynta, la taliyaha tijaabo siideyntuna wuxuu soo jeediyaa in qofkaas dhalinta yar la ciqaabo iyo in amarkii xukunka si un wax looga bedelo.

**Waalid**

***"Hawlsocodka maxkamada, Waa Hawlsocod. Marka u diyaarsanoow in uu qaato saacado badan, kuwaasoo aana annigu dhab ahaantii u diyaarsanayn labaddii goor ee ugu horeeyay"***

## Dhagaysigga U diyaar garoowga Garsoorka kiiska (Omnibus):

Dhagaysigaan maxkamada waxaa loogu tala galay in loogu diyaargaroobo dhagaysiga maxkamadda ee xaqiiqo raadinta ama garsoorka. Markuu socdo dhagaysigaan maxkamadda waxaa xeer illaaliyaha iyo Qareenka difaacuba maxkamada u sheegaan meesha diyaar garoowgooda ay u diyaargaroobaan maxkamada garsoorka uu marayo. Garsooraha waxaa laga yaabaa inu uu xaliyo arrimo taagan oo ay tahay in go'aan laga gaaro intaan horre loogu socon garsoorka. Hadday qaybaha kiisku tahay in ay wax kale sameeyaan si ay ugu diyaargaroobaan garsoorka maxkamadda. Intabadan waa balantaan marka garsooruhu go'aan ka gaaro in maxkamada garsoor la sii waddo iyo in dib loo dhiggo. Haddii qaybuhu diyaar u yihiin maxkamad garsoor, waxay soo gudbinayaan warbixinta maxkamadu u baahan tahay si ay si haboon ugu hogaamiso maxkamadda garsoorka.

**Karaan:** Waa dhagaysigga maxkamadda garsooruhu go'aan ka gaarro in qofka dhalinta yar "karaan" u leeyahay in uu maxkamad istaago. Qofka dhalinyaradda ah lama saari karo maxkamad garsoor hadduu yahay ama tahay mid aan "karaan" u lahayn in uu maxkamad istaago. Siduu u noqdo qofka dhalinta yari mid karaan u leh in uu maxkamad istaago, waa in qofka dhalinyaradda ah uu fahmi karaa hawlsocodka maxkamadda, uuna awood u leeyahay in uu caawiyo qareenkiisa ama qareenkeeda si uu u difaaco. Haddii qofka dhalinta yar aanu ka soo bixi Karin shuruudahaaan xaalad maskax darteed, qofka dhalinta yar ma istaagi karro maxkamad garsoor.

**Awood:** Waa dhagaysiga maxkamadda garsooruhu ka go'aaminayo in uu qofka dhalinta yar awood u lahaa iyo inuusan u lahayn awood si u uu u sameeyo falka dambi ee lagu soo oogay waqtigii lagu dacwooday in uu fal danbiyeedkaas dhacay. Sharciggu wuxuu ka soo qaadaa in qof dhalin yaro ah oo ka yar 12 jir uusan awood u lahayn in uu dambi galo. Si loogu qaado maxkamad garsoor qof da'daan ah, gobolku waa in uu muujiyaa inay ama inuu fahmi karo , fahmi karto falkaas uuna garan karaa in ay khalad tahay.

**Codsiyo:** Markasta oo qof dacwadda ka qayb ah uu weydiisto garsooraha go'aamin sharci ah oo ku saabsan arrin gaar ah, waxaa la yiraahdaa "codsi". Waxaa jirri kara codsiyo ku saabsan arrimmo badan oo kala gedisan kuwaasoo balamahooda lagu dhigi karo garsooraha hortiisa ama hadday codsiyadaan si toos ah ula xariiraan garsoor maxkmamadeed, waxaa badanaa la dhegeystaa bilowga maxkamada garsoorka markay dhacayso.

**Tijaabo siideyn:** waa marka qofka dhalinta yar garsooruhu ku amro in uu fulliyo shurruudo oo loo xilsaaro la taliye tijaabo siideeyn oo qaabilsan dhalinyarada kaasoo loo yaqaan (JPC). Waxaa La taliyaha tijaabo siideyntu markaas ka bacdi la shaqeeya qofka dhalinyarada ah si uu u hubiyo in uu qofkaasi ka soo baxo shuruudahaas. Tan waxaa kaloo loogu yeeraa Ilaalin.

**Shuruudaha tijaabo siideynta:** Shurruudaha tijaabo siideyntu waa kala gadisan yihiin qofka dhalinta yar ee kasta. Waxayna ku xiran yihiin hadba sidda garsooruhu dareemo inay ku haboon tahay. Shurruudaha tijaabadda ee inta badan garsooruhu amro waxaa ka mid ah in uu iskuulka taggo, in uu fuiliyo nidaamka gurriga ka degsen, in uu ka dheeraado wixii aan sharci ahayn. Marmarka qaarkood garsooruhu wuxuu amraao la talin, in daroogo laga daaweeyo, in uu bulshada u adeego iyo bixin magdhaw.

**Doorka JPC:** La taliyaha tijaabo siideyntu wuxuu la kulmaa oo teleefoonka kula hadlaa qofka dhalinta yar iyo waalidka in ku dhow laba goor bishii. Sidoo kale la taliyaha tijaabo siideyntu wuxuu u yahay qofka dhalinta yar iyo waalidka tixraac is deberid asagoo ka caawin kara in ay la hadlaan macalinka iyo la taliyaha wuxuuna ka qayb qaataa in uu ku dhiiri geliyo dhalinyarada in ay horumar ka gaaraan meelaha kale. Inkastoo la taliyaha tijaabo siideyntu leeyahay awood uu ku dalbado dhegeysi wax ka badelis haddaan qofka dhalinta yar ka soo bixin shurruudaha tijaabo siideynta, waxaa aad ugu wanaagsan qofwalba in uu haddii la kari karo in arrimaha dabeecadaha la xaliyo iyadoo aan dib loogu noqon maxkamad. La taliyayaasha tijaabo siideyntu waxay tababar gaar ah ku haystaan in ay si wanaagsan ula shaqeeyaan dhalinyarada waana ka go'antahay inay ka caawiyaan in ay si guul leh tijaabo siideyntooda ku dhamaystaan ayna bartaan inay sameeyaan ikhtiyaaro ka wanaagsan kuwa taagan.

**Doorka waalidka:** Waalidiinta waxaa si aad ah loogula talinayaa in ay ogaadaan shurruudaha tijaabo siideynta ee lagu xiray qofka dhalinta yar iyo in ay la tagaan dhamaan balamaduu la leeyahay la taliyaha tijaabo siideynta. Waalidka ayaa ah mid laga helo warbixinta ku saabsan sidda qofka dhalinta yar uu horumar u samaynayo ama haddii uu meelaha qaarkood uu qofka dhalinta yari la rafanayo. Waalidiin badan baa waxay u arkaan inay caawiso hadday qoraan dabeecadda qofka dhalinta yar ku dhaqmayo si markay qoraan ka bacdi ay ula wadaagaan la taliyaha tijaabo siideynta (JPC) kulamada kale ee ay la kulmaan.

Waxaan halkaan ku bandhigaynaa tusaale ku saabsan nooca qoraalka ay noqon karto inaad arruursate intaad marayso hawlsocodkaan. Inaad kuwaan qorto waxay kaa celinaysaa inaad ilowdo in aad warbaxin muhiim ah ood la wadaagto la taliyaha tijaabo siideynta marka kulanku socdo. Siddoo kale waa muhiim in aad diiwaan geliso horumarka wanaagsan ee qofka dhalinta yar samaynayo, marka lagu darro guuluhuu gaaray iyo dabeecad wanaag (nidaamka ilaaliyo, darajo fiican iskuulka ku keeno, guulo isboorti) hassa yeeshee haddii qofka dhalinta yar uu baxsado, waa in aad markaba la taliyaha tijaabo siideynta la socodsiisaa. Sidoo kale ogsoonow wax kasta oo aad ku tiraahdo la taliyaha tijaabo siideynta waxaa loo isticmaali karaa in lagu soo oogo eedaymo cusub ama tijaabadda u fiirsashadia ilmahaaga wax laga bedelo.

Markaad diiwaanka xasuus qorka wax ku qorayso, waa muhiim in aad ku arruuriso inta goor ee askarta dhacdo lala socodsiiyey, iyo inta dhacdo ee qofka dhalinta yari gurigga ka cararray ee la xariirta xaalada ilmaha.



# XUSUUS QORKA TIJAABO U FIIRSASHADA: TUSAALE

| TAARIIKH | WAQTIGA | WAXA DHACAY |
|---|---|---|
| 8/24 | 12duhur nimmo | Iskuulkiibaa soo wacay si uu u sheeggo in Jimmy aanu imaan iskuulka shalay." Jimmy wuxuu igu yiri in aanay shaqadayda ahan in aan ogaado meeshuu jiray. |
| 8/25 | 10subaxnimmo | "Jimmy" dabeecaddiisa raali gelin buu ka bixiyey wuxuuna yiri in uu iskuulka tegi doono isniinta soo socota. |
| 8/28 | 8subbaxnimo | "Jimmy" iskuulkuu tagaa maalintoo dhana wuu xaadiraa. |
| 9/2 | 1 subaxnimo | "Jimmy" ma joogo waqtigigi go'naa ee ay ahayd in uu gurigga joogo. Waan wacay waxaana ugu diray qoraal in uu yimaado gurrigga. "Jimmy wuxuu yimid gurrigga 1dii subaxnimo wuxuuna u eg yahay in uu wax cabsan yahay. |
| 9/3 | 9da subax-nimmo | "Jimmy" wuxuu iga dalbaday in aanu wargalin ka bixin inuu jabiyey waqtigii go'anaa ee ay ahayd in uu gurigas joogo in uusan imaan. Wuxuu yiri mar danbe ma samaynayo. Waxaan weydiiyay midda ah in uu cabsanaa wax, wuuna inkiray. |
| 9/7 | 2dda galabnimo | "Jimmy" wuxuu tagaa daruustii maxkamaddu u dirtay eek u saabsan sidda carodda loo xakameeyo. |
| 9/14 | 2pm | "Jimmy" wuxuu tegey daruusta ku saabsan sidda carradda loo xakameeyo. |

Maddaama ergodda maxkamadda dhalinyarada ay tahay mid ku salaysan in la caawiyo horrusocodka wanaagsan ee dhalinyarada, maxkamaddu waxay leedahay dhawr barnaamij oo qofka dhalinta yar uu xaq u leeyahay si uu uga qaybqaato. Waxaad la hadli kartaa la taliyaha tijaabo siideynta inta maxkamaddu socoto midda ku saabsan barnaamijyo noocee ah baa u furan qofka dhalinta yar iyo qoyska.

**Adeegyo ku salaysan Qoyska:** Fara galinta qoysku soo fara galiyaan qofka dhalinta yar, waa waxyaalaha aad loodersay, waana habab wanaagsan oo si wanaagsan loogu taageeri karo sida qofka dhalinyarada ahi u shaqeeyo. Daruustu waxay inta badan culayska saartaa hadafyada qoyska ee ku wajahan sii hagaajinta iyo caawinta qoyska. Taas oo ku saabsan in ay abaaraan hadafyadaani hadba nooca daryeelka markaas loo baahan yahay. La taliyeyaashu waxaa laga yaabaa inay soo booqdaan gurriga qoyska si ay ugula shaqeeyaan qoyska meeshay degen yhiin. La taliyeyaasha waxaa laga yaabaa in ay yihiin kuwo si gooni ah loogu tababaray la talinta tijaabo siideynta ama waxay noqon karaan la taliyeyaal kale oo ku tabobaran la talinta arrimaha bulshada.



**Xakamaynta Carradda:** Qofka dhalinta yar waxaa laga yaabaa in loo diro daruus ku saabsan sidda carradda loo xakameeyo, taasoo daaha ka qaada waxyaalaha kiciya carradda xoogga ah, waxaa kaloo daruustaan lagu bartaa xirfaddaha la isku dejiyo marka la carroodo iyo habbab kale oo lagu wada xariirro intii la carroon lahaa.

**Naseexayn:** Ka qayb qaadasho barnaamij naseexayn ah lagga qayb qaato waxay u noqon kartaa qofka dhalinta yar waayo arragnimmo xoog leh. Waayo waxay siisaa qofka dhalinta yar qof uu ka tusaale qaato oo ka baxsan qoyskiisa iyo dhalinyarada ficiisa ah. Qofka naseexaynaya iyo qofka dhalinta yar waxaa inta badan la isugu xulaa ayadoo la ee-gayo waxyaalahay wada daneeyaan ama baahidooda.

**Tababar Shaqo:** maxkamadda iyo xabsigga gaabaniba waxay leeyihiin barnaamijyo tababro shaqqo oo u bandhigga qofka dhalinta yar xirfaddo kala gadisan iyo sancooyin ka dhiga in ay dhexgalaan waxqabadyadda bulshada oo ay dhisaan karaankooda.

**Kaalmo Iskuul** Barnaamijyadda kaalmeeya iskuulka waxay cu-layska saaraan barista daruusta iyo faro gelinta waxba-rasho. Barnaamijyadaan waxay u lahaan karaan faa'iido ar-dayda dhibta ku qabta in ay fasalka joogaan sababtuna tahay daruustoo ku adag oon calaamado fiican keenin. Xar-iirinta iyo guusha laga gaaro iskuulka waxay si aad ah sal-ka ugu hayaan natiijadda guud ee u soo baxda ilmaha.

| **Liiska Taleefoonada ee Maxkamada Dhalin-** | **Phone** |
|---|---|
| Taleefoonka macluumaadka u gaarka ah Ilmaha –Halista-Ku jira/Googooya Iskuulka | 206-205-3865 |
| Xabsigga Dhalinyarada | 206-205-9634 |
| Macluumaadka Maxkamadda Dhalinyarada | 206-296-1395 |
| Xafiiska Garaaniga-Maxkamada Dhalinyarada | 206-296-9500 |
| Xafiiska Tijaabo siideynta Dhalinyarada | 206-205-9435 |
| Xafiiska Baaritaanka Tijaabo Siideynta Dhalinyarada | 206-205-9595 |

| **Liiska Taleefoonada ee Maxkamada Dhalinya-** | **Phone** |
|---|---|
| Macluumaadka Isha Waxbarashada | 206-205-9448 |
| Nidaamka Gaarsiinta Ka jawaabista Dhibaha Caruurta ee Degmada King County ee loo yaqaan King County's Children's Crisis Outreach Response System (CCORS) – Wuxuu u fidiyaa qofka dhalinta yar iyo qoyska ku nool degmada King County adeegyo u gaar ah wakhtiyada shidadda. | 206-461-3222 |
| Kooxda Qiimaynta Ee Degmada- Waxay gudoontaa dadka loogu soo dirro qiimaynaha Caafimaadka maskaxda. | 206-205-9737 |
| Kawada Shaqaynta Cadaalada Dhalinyarada ee loo yaqaan Partnership for Youth Justice – Waxay ka shaqaysaa barnaamijyada leexinta ee u gaarka ah Maxkamada Dhalinyarada ee Degmada | 206-296-1133 |
| Kor –u-kac ama Step-Up – Waxay adeegyo u fidisaa qoysaska degan degmadda King County ee leh dhalinyaro aan qaan gaarin oo dagaal guriga ku dhex sameeyey. Adeegyadaan waxaa qoysaskaas loo fidiyaa hadii ama maxkamadu amar maxkamadeed ugu soo dirto qoysaskaas ama ayaku iskood u dalbadaan. | 206-296-7841 |
| U kaalmaynta Dhibanaha- Wacyi gelinta dhibanayaasha si loo hubiyo ilaalintooda markay joogaan degmada King County. | 206-296-8871 |

| | |
|---|---|
| Taleefoon Taageero la waydiiyo wixii ku saabsan aalkolada iyo daroogada (www.adhl.org) – Taageero gobolkoo dhan ah baa diyaar ah. | 800-562-1240 |
| Adeegyada Dhalinyarad ee Auburn (www.ayr4kids.org) – Waxay caawiyaan qoysaska iyo dhalinyaradda ayagoo u fidinaya adeegyo ku saabsan la talin, ka hor tag iyo taageero oo u gaar ah degaanka deegaamada koonfurta degmedda King County. | 253-939-2202 |
| C.H.A.D (www.chadd.org) – adeegyo u gaar ah dhalinyaradda iyo dadka waaweyn ee qaba ADD/ADHD. Waxaa laga heli karaa adeegyadaan degmadda King County. | 206-264-5521 |
| Children's Home Society – Caawimaadda qoyska iyo caruurta. Waxaa laga heli karaa adeegyadaan degmadda King County iyo meelo badan oo gobolka ka mid ah. (www.childrenshomesociety.org) | 206-854-0700 |
| Community Psychiatric Clinic – Waxay balan qaadaan jid loo marro qof walba oo magaaladda Siyaatal iyo degmadda King County jooga in uu heli karo addeegyo nooca noloshiisa kor u qaadi kara asagoo maraya adeegyadda bulshadda ku salaysan ee u gaarka ah daryeelka caafimaadka dabeecadaha. | 206-461-4544 |
| Consejo Counseling and Referral—waxay u fidiyaan adeegyadda qoyska bulshooyinka laatiinka ah ee guud ahaan gobolka ku nool. (www.consejocounseling.org) | 206-461-4880 |
| Friends of Youth-serving the Eastside, Waxay bixiyaan la talin, meel lagu daweeyo, iyo adeegyo u gaar ah waxyaalaha si xun loo isticmaalo. | 425-869-6490 |
| Sound Mental Health (www.smh.org) – Waxay fidiyaan caafimaadka maskaxda ee dhamaystiran, sidoo kale daaweynta qabatinka kiimikada, iyo daaweeyno kale oo is barbar socda oo isku jira.Waxay adeegyadaan ku fidiyaan meelo kala gedisan oo ku yaala degmadda King County dhamaan. Waxay kaloo fidiyaan barnaamij kooxeedyo lagu taageerayo dhalinyarada. | 206-302-2300 |

**Sii socodka adeegyada Caafimaadka Maskaxda/ Khalad u isticmaalka walxaha**

| | |
|---|---|
| Therapeutic Health Services – Waxay fidiyaan carbinta ama baxnaaninta dadka ama qoysaska ay saameeyeen waxyaalaha la xariira qabatinka alkoloda, qabatinka daroogadda, iyo/ama buktooyinka maskaxda. Waxay adeegyadaan ku fidiyaan meelo ku yaala galbeedka gobolka Washington. (www.therapeutichealth.org) | 206-322-7676 |
| Valley Cities (www.valleycities.org) Xarrumaha caafimaadka dabeecadda ee bulshada ee ku kala yaala magaalooyinka, Auburn, Federal Way, Kent, iyo Renton. | 253-939.4055 |
| King County Sexual Assault Resource Center & Crisis Line – Waxay fidiyaan daaweyn, u doodis sharci,waxbarista waalidka,u doodis caafimaad iyo khad teleefoon oo 24 saac shaqeeya oo la Waco haddii dhib jirto iyo haddii adeegyo loo baahdo. | 425-226-7273<br>800-825-7273 |
| Harborview Sexual Assault Center/ Traumatic Stress - Waxay fidiyaan adeegyo u gaar ah caawimaada la xariirta wax u geysasho galmo, oogo ama nafsad ee uu sababay weerar galmo ama dhacdooyin kale oo musiibo ah. | 206-744-1600 |

**Adeegyadda Qoyska iyo Dhalinyaradda**

| | |
|---|---|
| A Village Project II –Waxay bixiyaan taggeerro, waxbarasho, iyo haggis u gaar ah dhalinyaradda iyo qoyska halista u ah in ay lugta la galaan mid iyo labbo ka mid ah nidaamyadda u adeegga qoyska. (en.avillageproject.org) | 360-866-8512 |
| Changes- Koox taageero oo loogu talo galay waalidiinta haysta caruur qaangaaraya oo dabeecaddo la soo baxaya. Barnaamijkaan waxaa laga helaa agagaarka Puget Sound (www.cpsn.org) | 888-468-2620 |

## Adeegyadda Qoyska iyo Dhalinyaradda

| | |
|---|---|
| NAMI (National Alliance on Mental Illness) – Waxay wax ka qabtaan baahidda aan la daboolin ee ay leeyihiin dadka xanuunadda maskaxda qaba iyo qoysaskooda ayagoo u fidinaya ,u doodis, waxbarasho dad weyne, warbixin iyo u diris addeegyo, iyo kooxo taageero oo ku saabsan sidda naftaada wax loo taro. Waxaa adeegyadaan laga heli karaa magaalada Siyaatal iyo degmadda King County (www.nami-greaterseattle.org) | 800-782-9264 |
| Puget Sound Adlerian Society– Waa hay'ad waxbarasho oo samo fal ah oo bixisa warbixin, u diris, seminaaro, daruus, adeegyo kale iyo taageerooyin kale oo caawiya waalidiinta iyo dadka kale. Bogga interneetka ee PSAS wuxuu muujiyaa jadwal faahfaahsan oo ku saabsan dhacdooyinka la xariira waalid ahaanshaha iyo taageeradda waalidka. (http://www.psasadler.org/) | 206-527-2566 |
| WA-DADS –Waxay u adeegtaa dhamaan daryeele yaasha labka ah iyo qoysaskooda leh caruur baahi gaar ah leh. Adeegyada hay'adaan fidiso waxaa ka mid ah wixii wax ka qabasho u baahan oo u gaarka ah caafimaadka maskaxdda, nafta iyo dabeecadda. Waxaa adeegyadaan laga heli karaa meel kastoo gobolka Washignton ah. | 866-241-8930 |
| Tusiyaha Kooxda taageeradda ee gobolka (www.counselingseattle.com) – Waxaad ka heli kartaa liiska adeegyada caawiya arrimaha la xariira caafimaadka maskaxda ee laga helo guud ahaan gobolka Washington. | Bog internetka kaliya |
| Youth 'N Action – Waxay fidiyaan tababar iyo caawimaad loo fidiyo dhalinyaradda noloshoodu halista ku jirto si ay isbedel ugu dhex sameeyaan bulshadda nidaamyadda caawiya bulshada ee ayaka u adeegaya. Waxaa laga heli karaa gobolkoo dhan. (www.YouthNAction.org) | 206-543-8596 |

## Adeegyo Kale oo Caawimaad Leh

| | |
|---|---|
| Community Information Line (www.crisisclinic.org) – Khadka taleefoonka oo marka la Waco siiya dadweynaha macluumaadkay u baahan yihiin islamarkaasna u tilmaama adeegyadda bulshada ee degmada King County oo caawimaaday raadinayaan ka heli karaan | Dial 211 or 206-461-3200 |
| Hopelink (www.hope-link.org) – Waxay adeeg u fidisaa qoysaska aan gurigga haysan iyo kuwa dhaqaalaha yar, sidoo kale waxay caawiyaan caruurta iyo waayeelka awooda daran ee guud ahaan degmadda King County. | 425-869-6000 |
| Seattle YMCA (www.seattleymca.org) –Waxay bixisaa barnaamijyo taageera qoyska oo ku yaala meelo badan oo degmadda King County ah. | 206-382-5003 |
| Team Child (www.teamchild.org) – Waxay bixisaa adeegyadda u doodista dadweynaha iyo wax baris bulsho si ay uga caawisso dhalinyarada in ay heli karaan adeegyo ku salaysan bulshadda. | 206-322-2444 |
| Teen Link (www.866teenlink.org) – Waxay fidisaa adeeg khad teleefoon ah oo caawiya dhalinyaradda aan qaan gaarin ee guud ahaan gobolka Washington. | 206-461-4922 |
| Street Youth Legal Advocates of Washington (SYLAW) – Waxay u fidisaa dhalinyaradda aan gurri lahayn ee noloshoodu halista ku jirto u doodis sharci oo madani ah , macluumaad iyo waxbarasho. (http://sylaw.org) | 206-659-5029 |
| Youthcare-The Shelter (www.youthcare.org) - Waxay u fidisaa caruurta aan gurri lahay iyo kuwa aan adeegyadaan ku filayn loo adeegay ee ku nool agagaarka magaalo weynta Seattle meel ay joogaan, rajo iyo caawimaad.. | 206.694.4500 |
| YWCA (www.ywcaworks.org) –Waxay siisaa haweenka iyo qoysaska ay hortooda yaalaan, rabshado, midabtakoor, iyo faqiirnimo.Waxay hay'adaan ka hawlgashaa degmooyinka King iyo Snohamish. | 206-461-4882 |

"Cross-over youth" Waxaa laga wadaa dhanlinyaro ku jirta nidaamka cadaaladda ee dhalinyarada isla markaana ku lug leh nidaamka daryeelka caruurta. Qof dhalinyar oo ku jira nidaamka daryeelka caruurta ayaa laga yaabaa in uu joogo guriga qoyska ku jira maarayn maxkamadeed, daryeel korin, ama daryeel kooxeed. Qofka dhalinta yar in uu ku lug lahaado labada nidaam waxay ku noqonaysaa qofka dhalinta yar, qoysaska korinaya, iyo qoysaska dhalayba cadaadis aad u fara badan waayo wuxuu ilmuhu lahaanayaa nidaamo badan oo ay tahay in uu dhex socdo.Tan waxaa inta badan macnaheedu yahay inay jiraan kulamo badan iyo balamo badan oo la tageyo. Waalidiinta ilmaha koriya waxaa laga yaabaa in aysan hubin in ay tahay masuuliyadooda inay tagaan kulamadaas iyo in kale.Waalidiinta koriya ilmaha aysan dhalin iyo kuwa dhalay ilmaha labadaba waxaa lagu dhiiri geliyaa markay haboon tahay in ay tagaan dhegeysiyadda maxkamadaha iyo in ay ka qayb qaataan hawlsocodka maxkamada sida ku haboon. Tani waxay maxkamada siinaysaa in ay si wanaagsan u dareento baahidda qofka dhalinta yar, taasna waxaa laga yaabaa in ay keento natiijo guud oo ka wanaagsan oo ka fiican markaysan tegin dhegeysiyadda maxkamadda.

Degmadda King County, dadaalaa socda si loogu fidiyo daryeel midaysan oo midka hadda jira ka badan oo u dhexeeya cadaalada dhalinyarada iyo shaqaalaha daryeelka caruurta. Dadaaladaas waxaa ka mid ah:

- In la ogaado in qofka dhalinta yar ee ku jira cadaaladda –uu yahay mid isla markaasna ku lug leh nidaamka daryeelka caruurta.
- Dhigis balamo isu duwis oo ku saabsan kulamo dhex mara tijaabo siideynta dhalinyarada iyo shaqaalaha qaabilsan dacwada daryeelka caruurta si loo yareeyo isku labalaabka aan loo baahnayn ee waqtigga iyo dadaalka qofka dhalinta yar.

- Balan qaadis la balanqaado wada xarir socda oo dhex mara tijaabo siideynta dhalinyaradda iyo daryeelka ilmaha, wada xariirkaan socda oo ku saabsan meesha horukaca iyo irrinta guri dejintu marayso.

## Maxaad samayn kartaa:

Markaad tahay waalid ilmo uusan dhalin korinaya iyo qof dhalinyarro ah oo ku lug leh daryeel korin ilmo aan la dhalin, la socodsii qareenkaaga difaaca iyo la taliyaha tijaabo siideynta in qofka dhalinta yar uu lugta kula jiro daryeelka ilmaha.

Weydii la taliyaha tijaabo siideynta, haddii qofka dhalinta yar la galiyey tijaabo siideyn in ay kulamadooda ka dhigaan kuwo dhaca isku markay la kulmayaan shaqaalaha gacanta ku haya dacwada daryeelka ilmaha, haddii ay tahay taasi mid addiga wax kuu taraysa.



| |
|---|
| **Xukumidda** – go'aanka maxkamadda ee uu garsooruhu soo saaro in qofka dhanlinta yar uu ku yahay danbiile danbigii lagu soo oogay. |
| **EEdaymo** – Waxa qof yiraahdo waa runta, laakiin aan weli la cadayn.(dembiyadda xeer ilaaliyuhu ku eedaynayo ilmaha in uu sameeyay waa eedaymo ilaa lagu cadeeyo maxkamad dhexdeed) . |
| **Maxkamad soo taagista qofka si uu u dacwo baxo** – Waa dhagaysiga ugu horeeya ee maxkamada ee ilmaha ee ilmaha la eedeeyay lagala taliyo eedaymaha lidka ku ah oo loo sheego xuquuqdooda ( qofka la eedeeyay wuxuu gala qirasho danbi ama inuusan dambiile ahayn) . |
| **ART** – Tababarka badalida bilaabista dagaal gardarro ah. Ee loo yaqaan Aggression Replacement Training. Waa barnaamijka degmadda  King County ee leh sadex darsi oo min saacad ah asbuucii oo socda muddo tobon asbuuc ah si loo hagaajiyo xirfadaha go'aan gaarista, sidda loo xakameeyo carroda iyo sabab sheegida anshaxa ku dhisan. |
| **ASD** – Badalka xabsi gaaban oo la illaaliyo ee loo yaqaan Alternatives to Secure Detention. Barnaamijyadaa waa kuwo uu socodsiiya xabsigga gaaban ee dhalinyarada waxaana laga kobciyey faham la fahmay in  bedel xabsi gaaban oo la illaaliyo uu hubiyo in qofka dhalinta yar uu yimaado maxkamadaha ku xiga maxkamadiisa waxayna yareeyaan dhicitaanka ay dhici karto danbiyo cusub marka uu qofka dhalinta yari bulshada ku dhex jirro. |
| **Qareen** – Xirfadle sharci oo tababaran kuna haysta laysan in uu masallo dadka maxkamadda dhexdeeda  waxaa kaloo loo yaqaanaa looyar. |
| **AVANZA** – Mashruuca Laatiinka ee Iskuulka Joog ee loo yaqaan Latino Stay in School Project,  waa barnaamijka tababarashada ee xilliga kulaylaha ah dhalinta laatiinka ah ee iskuulka ka maqnaada sabab la'aan ee da'doodu tahay 14-17  degmada Iskuulka ee Highline (Highline School District) |

| |
|---|
| **Building Bridges (OSPI)** – Waa barnaamij fidiya adeegyada ardayda iskuulka ka saaqidda dib loogu soo celinayo iskuulka oo wax looga qabanayo. Barnaamijkaan wuxuu u fidiyaa adeeg ardayda iskuulka ka saaqida ee Degmada Iskuulka Siyaatal (Seattle School District) iyo dhalinyarada noloshoodu halista ku jirto ee da'adoodu tahay 14-18 jir. |
| **Eedayn –** Waa wax falida ilmo si rasmi ah loogu eedeeyo in uu |
| **Siideyn Shardi** – Waxay dhacdaa marka ka jawaabaha laga siidaayo haysmada maxkamadda iyadoo uu ilaalinayo waalid, u adeegge bulsho, ama sarkaalka adeega maxkamadda. Inta badan waxaa jirra shurruudo go'an oo la xariira siidaynta oo haddii la jebiyo qofka dhalinta yar uu dib ugu noqonayo haysmada maxkamadda. |
| **Sii wadis –** Dib u dhigista dhegaysigga maxkamadda**.** |
| **La-Taliye**– Waa magac kale oo loo yaqaan qareenka ama looyarka |
| **La taliye maxkamaddu xilka u dhiibtay** – Waa qareen ama looyar |
| **Dambi** – Eeg errayga dambi. |
| **Waraysi su'aallo weydiin lagu hubinayo in qof run sheegayo iyo in kale** – Waa su aalaha uu weydiiyo markhaatiga qofka qareenka u ah qaybta aan u yeerin markhaatigga in uu marag furo. |
| **Bandow**– Waa marka sharciga ama amar maxkamadeed ka rabbo ilmaha in uu joogo gurriga oo wadooyinka uusan joogin waqtiyadda qaarkood maalintii. |
| **Masuulka ama ilaaliyaha** – Waa qofka si sharci ah xaq ugu leh in uu ilaaliyo waxa ilmuhu sameeyo isla markaasna ay saran tahay masuuliyadda in uu ka soo baxo baahidda aasaaska ah ee ilmaha. (waalidiinta, ilaaliyah, ama gobolka oo haysan kara masuuliyada ama |
| **DAJD** – Qaybta degmedda King County ee qaabilsan xabsigga gaaban ee dadka waaweyn iyo midka dhalinyarada.-Waaxda Dhalinyarada ayaa masuul ka ah daryeelka iyo haynta qofka dhalinta yar ee si gaaban ugu xiran xabsigga gaaban ee dhalinyarada. |

| |
|---|
| **DBHR**– Waaxda Caafimaadka dabeecada iyo Raysashada. Waa waax ka tirsan hay'adda DSHD ee maamusha barnaamijyadda adee-gyada ka hortagga ama yareeya si xun u isticmaalka waxyaalaha, xanuunadda maskaxda, iyo khamaarka mushkiladda ah. |
| **DBT** – Daawaynta akhlaaqda lahjadeysan ee loo yaqaan Dialectical Behavioral Therapy. Waa daawayn la isticmaalo si looga caawiyo qofka dhalinta yar iyo qoyska in ay bartaan xirfaddo loola jeedo inay kor u qaadaan awooda loogu fiirsanayo xaalada qiiradda ama shacuurta, lagu xakameeyo kicista shacuurta, loogu dulqaato carriiri-ga loolana dhaqmo dadka kale dabeecad tii hore ka wanaagsan oo sidii la rabay wax u taraysa. |
| **Dhegeysigga Maxkamadda Decline** – Waa habsocod looga gaarayo go'aan kiiska qofka dhalinyarada ah ee lagu soo oogay qaar ka mid ah eedaymo culus in loo gudbiyo maxkamadda qaada dacwooyinka dambiyadda dadka waaweyn, meeshaas oo garsoorka maxkamadiisa lagu qaadayo, haddii lagu xukumo in uu dambiile ya-hayna , xukunku ugu dhacayo sidii qof weyn. |
| **Xabsi gaaban** – Waa meel xiran oo caruurtu ku sugaan balantooda soo socota ee maxkamada ama xalinta kama dambaysta ah ee kiis-kooda. |
| **Xalinta Kama Dambaysta ah ee kiiska (disposition)**– Waa ni-daamka cadaalada dhalinyaradu qaabka uu u arko xukun maxkamaddeed. (Garsooruhu wuxuu go'aanka xalinta kama dam-baysta ah ee kiiska ku gaaraa dhegeysi maxkamaddeed) |
| **Leexin –** Waa marka qofka dhalinta yar loo diro maxkamada dhalinyarada sidii qof markii ugu horeysay ama markii labaad dambi gala ee sameeyay dambi sidda xatooyo dukaan, edebdarro xaasidni-mo ku salaysan, ama haysasho khamri. Kiisaska waxaa lagu xaalayn kara ka baxsan habsocodka maxkamadda. Tan waxaa inta badan la xaaleeyaa ayadoo la marayo guddi u gaar ah masuulad ahaansho dhalinyaro oo ku salaysan bulshada. |

| | |
|---|---|
| **DSHS-CA** – Hay’adda Adeegyadda caafimaadka iyo bulshada-maamulka caruurta ee loo yaqaan (Department of Social and Health Services-Children’s Administratio), Waa hay’ad gobol oo mas’uul ka ah daryeelka caruurta iyo dhalinyarada gobolka Washington.Waxay ha’adaan fidisaa qorshe adeegyo caawiya qoysaska hubiyana nabad gelyadda iyo wanaaga caruurta. | |
| **Nidaamka Xuquuq dhawrista (Due Process)** – Maxkamaduhu waa in ay raacaan habsocod xaq iyo cadaalad ah; tusaale ahaan waa in ay caruurta siiyaan ogeysiis lagua socodsiinayo balanta dhegeysigga maxkamadda iyo xaqa ay u leeyihiin in ay dooda dhankooda soo bandhigaan. | |
| **Barnaamijyadda cadaynta ku salaysan ee loo yaqaan Evidence-Based Programs (EBP)** – Waa barnaamijyo daaweyneed oo si wanaagsan loo darsay oo leh baaritaan cilmi ku dhisan oo xaqiijiyey siday saamayn u leeyihiin. | |
| **Dhegeysigga Maxkamadda ee Xaqiiqo Raadinta (Fact-Finding Hearing)** – Sidoo kale, loo yaqaano garsoor maxkamaddeed. Waa dhegeysigga maxkamadda ee uu xeer illaaliyaha iyo qareenka qofka dhalinta yar ay su’aallo weydiinayaan markhaatiyaasha, su’aallohaas oo ku saabsan faah-faahinta la xariirta dambigga lagu soo eedeeyay qofka dhalinta yari in uu galay.Garsooraha ayaa go’aanka u gaarka ah qofka dhalinta yar in uu yahay dambiile ku yahay dambiga lagu soo eedeeyey iyo in aanu ahayn dambiile gaara, asagoo ku salayna-ya go’aankaas sharciga iyo cadaymada la soo bandhigay. | |
| **Dambi Weyn (Felony) –** Wax falid ama dambi halis ah oo leh ciqaab ay dhici karto inay leedahay muddo dheer oo xarrig ah (dambiyada kuwaan ka fudud waxaa la yiraahdaa dambiyo xun oo aan saas u weyneyn ama falfalxumo oo loo yaqaan (misdemeanors). | |
| **Dhegeysigga Maxkamadda ee Koowaad –** Waa dhegeysi maxkmaddeed oo la qabto ka dib marka qofka dhanlinta yar la keeno xabsigga gaaban midkaasoo uu garsooruhu ka gaarro go’aan midda ku saabsan in maxkamaddu awood ku leedahay kiiskaan marka la eego cadaymaha la hayo si dib loogu sii socodsiiye tilaabooyinka sharcigga ah ee laga qaadayo qofka dhalinta yar. | |

| | |
|---|---|
| **FIT – Marxallad Kala guurka loo dhan yahay ee Qoyska (Family Integrated Transitions.** Waa fara galin aad ah oo guriga ku salaysan oo qoysku fara galinayao qofka dhalinta yar ee isticmaala wax ama xanuun maskaxda ah qaba. | |
| **FFT –** Daaweyn Shaqaynaysa ee Qoyska,(Functional Family Therapy) Waa barnaamij gaaban oo ku salysan qoyska oo looga hortagayo ama lagu fara gelinayo caruurta aadka halista ugu jira ee da'doodu u dhaxayso 11 illaa iyo 18 sanno. | |
| **Ilaaliye ama Wali–** Waa qof weyn oo xaquuq sharci ah u leh in uu go'aan ka gaaro daryeelka ilmaha. Waligu wuxuu noqon karaa ilmaha waalidkiis, xubin ka mid ah qoyskiisa, qof aan waxba u ahayn oo weyn, ama gobolka. | |
| **Dhegeysi –** Waa kulamada maxkamadda ee ka dhici kara meesha sugitaanka maxkamadda oo lagula kulmo qareenka ama looyarka ama ka dhaca garsooraha hortiisa marka la joogo maxkamaddda gudaheeda. | |
| **Imtixaanid –** Su'aallo weydiinta su'aallaha la weydiiyo qofka dacwadda ka jawaabaya, qofka la tuhunsan yahay ama markhaatiga ah. | |
| **JPC** – La taliyaha Tijaabo Siideynta Dhalinyarada. (Juvenile Probation Counselor) – Waa xirfadle ka socda Maxkamadda Dhalinyarada ee degmadda King County oo shaqooyinkiisa ay ka mid yihiin u diyaarin uu u diyaariyo maxkamadda warbixinno iyo maareynta dhalinyaradda oo uu ku maareeyo awooda wax xukumidda ama maamulka maxkamadda hoostiisa. | |
| **JRA –** Maamulka Carbinta Dhalinyarrada waa maamul ku dhexjirra DSHS ta oo u adeega Gobolka Washington dhalinyaradiisa ugu khatarta badan ee dambiyadda. Waxaa laga yaabaa in maxkamad dhalinyarro oo ku taala degmaday doonto gobolka Washington ay galiso qofka dhalinta yar haysmadda JRA. Maxkamaddaha dhalinyarradu waxay raacaan xeerar xukumis oo hore loo qoray si go'aan looga gaaro qofkee dhalinyar baa la galinayaa JRA.Dhalinyarada barnaamijkaan la galiyo caadatan waxay sameeyeen dambiyo badan oo heer hoose ah ama waxay dambiyo | |

| | |
|---|---|
| **Awooda maamulka maxkamadda –** Waa awooda maxkamaddu ay u leedahay in ay dhagaysato oo go'aan ka gaarto kiis loo haysto ilmo. |
| **Dhalinyarro –** qof ala qofkii ka yar da'da isku xigta ee sideed iyo tobon sanno. |
| **Barnaamijka Dib ugu celinta iskuulka dib loogu celiyo ardayda ka Saaqiday ee loo yaqaan PathNet: Drop-Out Retrieval** – Waa barnaamij bixiya taageero Iskuul ku mashquulid, dib ugu celiya ardayda iskuulka, kana hortagga ka saaqidida iskuulka laga saaqido .Waxaa barnaamijkaan laga heli karaa degmadda King County. |
| **Qiraal Cafis-doon**– Marka qareenka ama looyarka ilmaha iyo xeer ilaaliyuhu ay gaaraan heshiis lagu dhameeyo eedayntii danbiga; inta badan ilmuhu wuxuu ogolaadaa in uu qirto in uu galay dambiga si looga khafiifiyo cadadka iyo adkaanshaha eedaymaha. |
| **Warbixinta Waxa Kalifay** – waa warbixin uu diyaariyo sargaalka tijaabo sii deynta si garsooruhu u tix geliyo markuu dhacayo dhegeysiga maxkamda ee u gaarka ah xukunka. Warbixintaan waxaa ka mid ah qoraal ku saabsan taariikhda qoyska iyo dib u eegid dabeecadda qofka dhalinta yar. |
| **Tijaabo siideyn** – Marka dhalinta uu galiyo garsoore barnaamijka tijaabo siidayntu waxaa qiimayn ku sameeya la taliyaha tijaabo siideynta (JPC) si go'aan looga gaarro heerka maaraynta ay u baahan yihiin lana hubiyo in ay raacaan dhamaan sharuudihii maxkamaddu ku amartay, ila markaasna loo fidiyay qoyska iyo qofka dhalinta yarba adeegyadii ku haboonaa. |
| **Dambi ku oogid** – Waa habsocodka lagu keeno qof maxkamad garsoor eedaymo dambi dartood. |
| **Xeer Ilaaliye** – Qareenka ama looyarka degmadda ee eedaynta dambi ku soo ooga qofka dhalinta yar ee ka jawaabaya dacwada. |
| **Difaace Dadweyne** – Qareen ama looyar maxkamadu u xilsaartay in uu masalo qofka dhalinta yar ee ka jawaabaya dacwada ee aan awood u lahayn in uu qabsado assagu qareen ama looyar. |

| |
|---|
| **Caadaysi Xukumid Dambiyeed** – ku soo celin xukumid dambiyeed. |
| **Sheegashada Mustaqbalka** – Waa barnaamij bulsho oo lagu isticmaalo maxkamadaha dhalinyarada ee degmada King County. Waxaa barnaamijkaan leeyahay tusaale-lix-talaabo ah oo caawiya dadka dhalinta yar ee dhibta ku qaba droogoda, Aalkolada iyo dambi. |
| **Ka jawaabe** – qof dhalinyar oo ku hoos jira maamulka maxkamada dhalinyarada oo lagu eedeeyay jabinta sharci federaali ah ama gobol ama munishiibiyo. |
| **Magdhow**– lacagta qof dacwo ka jawaabaya uu u siiyo dhibanaha khasaarooyin soo gaaray oo uu sababtooda lahaa eedaysanuhu. |
| **Xeer Da'a Jebiye** – Ilmo lagu eedeeyay in uu sameeyay wax sharci darro ku ah kaliya dadka da'doodu ka yar tahay 18sanno. Sidda ka cararis guri. Dadka waaweyn laguma eedayn karo da mbiyada xeerka da'ada. |
| **Qaanuun-qoran** – Sharci ay qaateen ama gudbiyeen gudigga sharci dejinta ee gobolka. |
| **Maxkamadda Darooggada ee Caruurta –** Daawaynta degdegta ah ee wax isticmaalka iyo maamulista dhagaysiyadda asbuuc walba oo socota muddo 9-12 bilood ah. |
| **Barnaamijka Naseexaynta** – Waa barnaamij naseexayn iyo taageero hal qof-qof loo bixiyo oo ay bixiyaan dad ku tababaran in ay bixiyaan naseexayn. |
| **MTFC** – Daaweynta wajiyadda badan ee daryeelka haysmadda. Daaweyn u gaar ah caruurta nidaamka daryeelka haysmadda ah ku jirta ee leh walaacyo badan oo la xariira xag qoys ama akhlaaqeed. |
| **Xaquuqda ama Digniinaha Miranda** –Waa digniinaha la helo marka ilmaha la qabto ee u sheega ilmahaas (asagga ama iyadda) xaqqa uu u leeyahay ama ay u leedahay inay aamusto ama uu aamuso iyo xaqqa uu u leeyahay ama ay u leedahay in uu haysto |

| | |
|---|---|
| **Falfalxumo** – Waa fal dambiyeed ka fudud danbi weyn | |
| **MST** – Daaweyn nidaamo badan leh. Waa daaweyn ku salaysan bulshada oo loogu tala galay caruurta da'doodu tahay 12 ilaa iyo 17 sanno jir ee leh kala daadsananaan dabeecada ah oo culus ee halista u ah in la geeyo meel ka baxsan gurriga. | |
| **Jabin Sharci –** Wax samayn haduu sameeyo qof wayn laga soo qaado inay tahay dambi. | |
| **Kor-u-Kac (Step Up)** – Waa barnaamij la taliya koox oo loogu tala galay dhalinyarada degmadda King County ee la dagaalama xubnaha qoyskooda. Waalidka iyo qofka dhalinta yarba way tagaan barnaamijkaan oo ah hal kulan kooxeed asbuuciiba socdana muddo 20 asbuuc ah. | |
| **U yeeris Maxkamad ee loo yaqaan Subpoena** – Waa warqad sharci ah oo ku amraysa qofka magaciisu ku xusan yahay warqadaan in uu ku yimaado maxkamada maalinta iyo waqtiga warqada ku qoran maxkamada sidda go'an loo sheegay si uu kiis uga markhaati furo. | |
| **Barnaamijka fujinta masawirka jirka lagu masawiro** – Fujinta mawirka jirka -Blink – Waa adeegyo masawirka jirka lagu fujiyo ileys. Waa barnaamij iskaa wax u qabso aha oo loogu talagay dhalinyarada maxkamada lugaha kula jira. Waxaa barnaamijkaan u baahan yahay in waalidku ogolaado iyo in la keeno cadayn in uu qofka dhalinta yar ka soo baxay adeegyadi bulshada ee loo diray. | |
| **Maxkamad Garsoor**– Eeg dhagaysigga maxkamada ee Xaqiiqo Raadinta. | |
| **Markhaati** – Hadal cad oo la sheego ama bayaan la sameeyo si loo suggo xaqiiqo ama xaqiiqooyin oo la bixiyo ayadoo la dhaartay. | |
| **Arday goo-goys ah** – Ilmo ama qof dhalinyarro ah oo shan goor iyo ka badan si aan cudur daar lahayn uga maqnaaday iskuul bil gudaheed ama tobon goor sannad gudihiis. | |

**Mashruurca Dhisida mustaqbalada ee Hay'adda shaqaalaha Dalka Maraykan** – Waa mashruuc dad badan ka wada shaqeeyaan oo fidiya tababar xirfad shaqo, hordhac –tababar, iskool, caawimaad iyo tababar ayadoo lacag la qaadanayo oo u gaar ah dhalinyarada da'doodo tahay inta u dhaxaysa 14-21 sanno ee ah ama dhalinyaro dambi galay ama Halis ku Jira.

**Hay'adda Shaqaalaha ee Dalka Maraykan: Mashruuca LEAP ee u gaarka ah deeqda dib- ugu noqoshada bulshada ee dahlinyarada**– Waa barnaamij u adeega dhalinyarada da'doodu tahay inta u dhaxaysa 14-21 sanno jir ee ka baxa xabsigga gaaban. Waxaa adeegyadaan ka mid ah adeegyadda ka horeeya tababarrada shaqo, caawimaad shaqo iyo iskuul, dib-ugu noqosho iskuul iyo ka hortagga iskuul ka saaqidida. Adeegyadaan waxaa lagu fidiyaa deg-

**Barnaamijka Vest: Horumarinta Xoogga Shaqadda** – Waa barnaamij ku bixiya meelo kala gadisan ee degmadda King County diyaaar garoow shaqo, sahamin xirfad, adeegyo bulsho iyo tababarro iyadoo tababartuhu qaadanayo lacag. Adeegyadaan waxay diyaar u yihiin dhalinta da'doodu tahay inta u dhaxaysan 15-18 sanno jir ee tijaabo siideynta ku jirta.

**Markhaati** – Qof haya warbixin la xariirta arrin maxkamaddu go'aankeeda gaareyso.

**Waraysiyadda Markhaatigga** – Waraysiyo aan si rasmi ah u dhicin oo ama xeer illaaliyaha ama qareenka difaacu la lahaado markhaatiyaasha iyo dhibanayaasha ka hor inta aan maxkamadda garsoorka dhicin. Waraysiyaddaan waxaa markhaatiyaasha iyo dhibanayaasha lagu weydiiyaa wax ku saabsan waxay ka ogyihiin dambigga(dambiyadda)